

# XIRMADA MACLUUMAADKA BIXITAANKA

Loogu talagalay codsadayaasha magangelyada caalamiga ah  
iyo ka-faa'iideysteyaasha magangelyada caalamiga ah ee  
jooga Qubrus.

Nofeembar 2023

QEYBTA 1: Xuquuqaha iyo Waajibaadyada <b>codsadeyaasha magangelyada caalamiga ah</b> .....	2
1. Habraaca Magangelyada.....	2
2. Beddelashada Cinwaanka / Lambarka Telefoonka .....	2
3. Xayiraadaha Safarka.....	4
4. Xuquuqda shaqo .....	4
5. Iska Diiwaangelinta Xafiiska Shaqada .....	8
6. Codsashada macaashyada Adeegga Daryeelka Bulshada.....	8
7. Samaysashada koonto bangi.....	11
8. Helitaanka Adeegyada Daryeelka Caafimaadka.....	11
9. Habraacyada iyo ballamaha loogu talagalay dhallaanka cusub.....	12
10. Raadinta Guri .....	13
11. Helitaanka Waxbarasho .....	13
QEYBTA 2: Xuquuqaha iyo Waajibaadka ka-faa'iidaystaha magangelyada caalamiga ah (Xaaladda Qaxoontinimo iyo Magangelyo Hoosaadka) (Refugee Status and Subsidiary Protection).....	15
1. Ka-faa'idaysteyaasha magangelyada caalamiga ah .....	15
2. Xuquuqaha iyo Waajibaadka Kale.....	15
2.1 Ruqsadda Deggunaanshaha .....	15
2.2 Codsiga ruqsadda degganaanshaha.....	15
2.3 Halka codsiga la geeyo .....	16
3. Xuquuqda safarka .....	17
4. Xuquuqda dib-u-mideynta qoyska.....	18
5. Xuquuqda shaqo .....	18
6. Macaashyada daryeelka- EEE.....	18
6.1     Qaddarta ay ku deeqday EEE: .....	18
6.2     Sida loo codsado. ....	19
6.3     Halka codsiga la geeyo. ....	19
6.4     Waajibaadka ka-faa'iidaystaha .....	19
7. Xuquuda caafimaad .....	20
8. Kharashka ku baxa GESY .....	21
9. Xuquuqda Waxbarasho.....	22
9.1. Carruurta iyo dhalinta .....	22
9.2 Dadka qaangaarka ah- Helitaanka Waxbarasho Sare .....	23
Ururada Caalamiga ah iyo Hay'adaha Aan Dawliga Ahayn (NGOs) ee Adeegyo Siyya Codsadeyaasha	23
Xiriirada muhiimka ah .....	25
Cuntooyinka iyo Deeqaha Lacag La'aanta ah.....	25
Cinwaanada muhiimka ah.....	26

## Horudhaca

Xirmadan macluumaadka waxaa loola jeedaa dhammaan xuquuqaha iyo waajibaadyada codsadeyaasha magangalyada caalamiga ah iyo/ama ka faa'iidaystayaasha magangalyada caalamiga ah ay leeyihii iyo/ama ay helaan, marka ay ka soo gudbaan Pournara FRC ama ay ka baxayaan Xarunta Soodhawaynta iyo Hoyga ee "Kofinou" ama "Limnes". Tani waxaa sidoo kale ka mid ah adeegyada kala duwan ee laga bixiyo dhulka Qubrus iyo sharraxaad faahfaahsan oo ku saabsan sida loo hello. Haddaba xirmadan macluumaadka ah waxa loo qeybiya 2 qeybood oo waaweyn:

1. Xuquuqaha iyo Waajibaadyada **codsadeyaasha magangelyada caalamiga ah**.
2. Xuquuqaha iyo Waajibaadka **ka-faa'iidaystaha magangelyada caalamiga ah** (Xaaladda Qaxoontinimo iyo Magangelyo Hoosaadka).

Ugu dambeyntii, dhamaadka xirmadan waxaa ku jiri doona 2 qeybood oo dheeraad ah, mid soo bandhigaysa liiska dhammaystiran ee Hay'adaha Caalamiga ah iyo Hay'adaha Aan Dawliga Ahayn (NGOs) ee adeegyada siiya magangalyo-doonka iyo mid kale oo ay ku qoran yihiin cidda kale ee lala xiriiri karo ee muhiimka ah iyo macluumaadka codsadeyaasha iyo ka-faa'iidaystayaasha magangelyada caalamiga ah labaduba.

### QEYBTA 1: Xuquuqaha iyo Waajibaadyada **codsadeyaasha magangelyada caalamiga ah**

#### 1. Habraaca Magangelyada

Kadib marka la xareeyo codsiga magangelyada, Adeegga Magangalyada (CAS, Asylum Service) ayaa kugu ogeysiin doona wicitaan iyo/ama warqad rasmi ah oo qoran oo ku saabsan taariikhda iyo wakhtiga la qaadayo waraysiga magangelyada.

#### 2. Beddelashada Cinwaanka / Lambarka Telefoonka

Si ay u beddeshaan cinwaanka guriga iyo/ama lambarka telefoonka, codsadeyaashu waa inay siiyan Adeegga Magangelyada:

- buugga aqoonsiga ama warqadda xaqijinta (asal iyo nuqluba) iyo,
- caddaynta cinwaanka (heshiiska kirada ama biilka tamarta oo magaciisa ku qoran<sup>1</sup> asal iyo nuqluba)

**Tani waa mid aad muhiim u ah sababtoo ah, haddii ay dhacdo in mas'uuliyiintu ay u diraan codsadeyaasha inay keenaan waraaqo balse aan laga soo jawaab-celin, waxay xiri karaan faylka codsadaha.** Haddii aad beddelayso lambarka telefoonkaaga, isla habraac la mid ah waa in la raaco, sababtoo ah isla arrin la mid ah ayaa dhici karta. Codsadeyaasha waxaa laga yaabaa inay xaqijiyaan wax-ka-beddelka cinwaanadooda kadib markay booqdaan Adeegga Magangelyada.

Sidoo kale, si aad guriga ugu sii hesho waraaqaha boostada, waxaa lagu talinayaa in laga beddelo cinwaanka **Qaybta Socdaalka Magangelyada ee Booliska (AIU, Asylum Immigration Unit) ee degmada aad deggan tahay**, taasoo u adeegta isla sida goobta kale ee loo qoondeeyay in loo soo gudbiyo caddaymaha isbeddelka, beddelkii laga beddeli lahaa xafiisyada Adeegga Magangalyada ee ugu waaweyn.

<sup>1</sup> Haddii caddaynta cinwaanka aysan ku qornayn magaciisa, markaa xaqijin bulsheed ayaa looga baahan yahay Madaxa bulshada deegaanka.

Codsadayaasha waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan foomka gaarka ah ee la siiyo. Foomka, oo ay la socdaan dokumeentiyada kor ku xusan, ayaa la qiimeeyaa oo marka la hubiyo in wax walba ay sax yihin, isbeddelka la codsaday ayaa la xaqiijiyaa.

Si ay u beddelaan cinwaanka/lambarka telefoonka, codsadeyaashu waa inay booqdaan mid ka mid ah xafiisyada soo socda ee hoos ku yaala ee furan 08:00 – 13:00:

GOOBTA	XIRIIRADA
<b>Nicosia – Asylum Service (Adeegga Magangelyada)</b>	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 70, Arch. Makarios Avenue, Afemias House, 1077 <b>Telefoonka:</b> 22-308501/ 22-308505
<b>Nicosia –Asylum Immigration Unit (Qaybta Socdaalka Magangelyada)</b>	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 6, Agamemnonos Street, Engkomi, 2411 <b>Telefoonka:</b> 22-802332 / 22-802353 / 22-802341
<b>Larnaca – Asylum Immigration Unit (Qaybta Socdaalka Magangelyada)</b>	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 34, Tassos Mitsopoulos Avenue, Makenzy, 6927 <b>Telefoonka.:</b> 24-804233 / 24-804223 / 24-804231
<b>Limassol – Asylum Immigration Unit (Qaybta Socdaalka Magangelyada)</b>	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 223, Franklin Roosevelt Street, Nicolaou Building, 2d Floor, 3046. <b>Telefoonka:</b> 25-805210 / 25-805212 / 25-805650.
<b>Paphos – Qaybta Socdaalka Magangelyada (Asylum Immigration Unit)</b>	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 22, Corner Kanningos and Eleftheriou Venizelou, Nicolaou Court, 8021. <b>Telefoonka:</b> 26-806222 / 26-806214 / 26-806211 / 26-806215.
<b>Famagusta – Qaybta Socdaalka Magangelyada (Asylum Immigration Unit)</b>	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 31, G. Papadopoulou, 5282, Paralimni <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>Telefoonka:</b> 23-803286 / 23-803290 / 23-803287 / 23-803285.</li> </ul>

FIIRO GAAR AH: Saacadaha Shaqo ee Xafiisyada sare: 7:30-14:30

### 3. Xayiraadaha Safarka

Codsadeyaasha magangelyada caalamiga ah waxay si xor ah u degi karaan ugana guuri karaan aaggaga ay gacanta ku hayso Jamhuuriyadda Qubrus inta codsiga magangelyada laga qiimeynayo.

U safrida meel ka baxsan Qubrus ayaa loo oggolaan karaa sababo bini'aadantinimo oo keliya. Markan oo kale codsaduhu waa inuu oggolaansho gaar ah ka codsadaa Adeegga Magangelyada waana inuu sidoo kale dokumeentiyada lagu safro ka codsato Qaybta Diiwaangelinta Madaniga (Civil Registry and Migration Department) ah iyo Waaxda Socdaalka.

Codsadeyaasha magangelyada caalamiga ah looma oggola inay safraan iyo/ama booqdaan aagga waqooyi ee la haysto.

### 4. Xuquuqda shaqo

Codsadeyaasha waxaa loo oggol yahay inay shaqeeyaan 9 bilood<sup>2</sup> kadib marka codsigooda la xareeyo.

Si ay u helaan rukhsad shaqo, codsadeyaashu waa inay ka diiwaangashan yihin Degelka Shaqada. Tani ayaa looga sameeyaa si elektaroonig ah barta [www.mlsi.gov.cy](http://www.mlsi.gov.cy), ama iyadoo la booqanayo Xafiisaya Shaqo ee Degmada:

NICOSIA	XIRIIRADA:
Xafiiska Shaqo ee Degmada Nicosia (Nicosia District Labour Office)	<b>Cinwaanka Boostada:</b> District Labour Office CY-1464 Nicosia  <b>Cinwaanka waddada:</b> 3 Mousiou str. Nicosia  <b>Telefoonka:</b> 22403000 Fakiska : 22873170 Ilmaylka : <a href="mailto:dlonic@dl.mlsi.gov.cy">dlonic@dl.mlsi.gov.cy</a>
Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Lakatamia (Lakatamia Local Labour Office)	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> Corner Makariou III Ave. and 16 Apostolou Varnava str. 2312 Lakatamia  <b>Telefoonka :</b> 22443717 Fakiska: 22443718
Latsia Local Labour Office (Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Latsia)	<b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 5A&B Demetri Stavrou Ave. 2224 Latsia  <b>Telefoonka.:</b> 22815848 Fakiska: 22815868

<sup>2</sup> Wasiirka Shaqada iyo Caymiska Bulshada (Minister of Labour and Social Insurance) ayaa markay ahayd 29-kii Sitembar 2023 ayaa soo saaray Digreeto Lambarkeedu yahay 312/2023 taasoo dhigaysa in codsadeyaasha loo oggol yahay inay shaqeeyaan 9 bilood kadib marka codsigooda la xareeyo. Wareegtada ayaa lagu yiri, Wasiirka ayaa sidoo kale cusbooneysiiy shaxda waaxaha ee codsadaayaasha la oggol yahay inay ka shaqeeyaan.

Wareegtada ayaa lagu daabacay faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Qubrus, (nasiibdarrose waxaa lagaga heli karaa Af-Giriig oo keliya), gujo-raaca soo socda:

[https://www.mlsi.gov.cy/mlsi/dl/dl.nsf/76e9ef5cadba76dfc225809f002ac669/47e9a38e774d6884c225809f002c0d2f/\\$FILE/%CE%9A.%CE%94.%CE%A0.31%20%202023.pdf](https://www.mlsi.gov.cy/mlsi/dl/dl.nsf/76e9ef5cadba76dfc225809f002ac669/47e9a38e774d6884c225809f002c0d2f/$FILE/%CE%9A.%CE%94.%CE%A0.31%20%202023.pdf)

LIMASSOL	XIRIIRADA:
Xafiiska Shaqo ee Degmada Limassol (Limassol District Labour Office)	<p><b>Cinwaanka Boostada:</b> P. O. Box 71036 CY-3840 Limassol</p> <p><b>Cinwaanka waddada:</b> 80 Franklin Roosevelt Avenue Social Insurance Building, 2nd floor Limassol</p> <p><b>Telefoonka:</b> 25827350 Fakiska: 25306526 limaylka: <a href="mailto:dlolim@dl.mlsi.gov.cy">dlolim@dl.mlsi.gov.cy</a></p>
Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Ypsonas (Ypsonas Local Labour Office)	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 2, Oresti str. 4186 Ypsonas</p> <p><b>Telefoonka.:</b> 25826900 Fakiska: 25305796</p>
Eastern Limassol Local Labour Office (Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Bariga Limassol)	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada;</b> 78, Griva Digeni avenue 3101 Limassol</p> <p><b>Telefoonka.:</b> 25814914 Fakiska: 25814923</p>
Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Agros (Agros Local Labour Office)	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 30, Agros str. 4860 Agros</p> <p><b>Telefoonka.:</b> 25874074 Fakiska.: 25521061</p>
Tagida Xarunta Adeegga Muwaadinka ee Pelendri	<p><b>(Isniin iyo Khamiis Walba)</b></p> <p><b>Telefoonka.:</b> 25813400 Fakiska.: 25813410</p>
PAPHOS	XIRIIRADA:
Paphos District Labour Office (Xafiiska Shaqo ee Degmada Paphos)	<p><b>Cinwaanka Boostada:</b> P. O. Box 60067 CY-8100 Paphos</p> <p><b>Cinwaanka waddada:</b> 1, Ayiou Spyridonos str, 8021 Paphos</p> <p><b>Telefoonka:</b> 26821658/660/649 <b>Fakiska:</b> 26821670 limaylka: <a href="mailto:dlpaphos@dl.mlsi.gov.cy">dlpaphos@dl.mlsi.gov.cy</a></p>
Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Polis (Chrysokhou) (Polis (Chrysokhou) Labour Office )	<p><b>Cinwaanka Boostada:</b> P.O. Box 66155 8820 Polis Chrysokhou</p> <p><b>Cinwaanka waddada:</b> Corner 1 Arsinoes Ave and Timohari str. CY-8820 Polis Chrysokhou</p>

	<b>Telefoonka.: 26821841 Fakiska: 26821850</b>
<b>LARNACA / FAMAGUSTA</b>	<b>XIRIIRADA:</b>
<b>Xafiiska Shaqo ee Degmada Larnaca (iyo Famagusta) (Larnaca (and Famagusta) District Labour Office)</b>	<p><b>Cinwaanka boostada:</b> P. O. Box 40136 CY-6301 Larnaca</p> <p><b>Cinwaanka waddada:</b> Philios Tsigarides Street Social Insurance Building Larnaca</p> <p><b>Telefoonka: 24805312 Fakiska: 24304532</b> <b>limaylka: <a href="mailto:dlolca@dl.mlsi.gov.cy">dlolca@dl.mlsi.gov.cy</a></b></p>
<b>Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Aagga Famagusta ee Xorta ah (Free Famagusta Area Local Labour Office)</b>	<p><b>Cinwaanka boostada:</b> P. O. Box 36166 CY-5386 Dherynia</p> <p><b>Cinwaanka waddada:</b> 49 Acropoleos Street 5380 Dherynia</p> <p><b>Telefoonka: 23812052 Fakiska: 23730465</b> <b>limaylka: <a href="mailto:dlopar@dl.mlsi.gov.cy">dlopar@dl.mlsi.gov.cy</a></b></p>
<b>Xafiiska Shaqo ee Maxalliga ah ee Aradippou (Aradippou Local Labour Office)</b>	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 20 Acropoleos str. Aradippou</p> <p><b>Telefoonka.: 24813295 Fakiska: 24813302</b></p>

Codsadeyaashu waxaa la oggolyahay inay ka shaqeeyaan oo keliya waaxaha soo socda iyo xirfadaha shaqo ee soo socda:

	<b>QAYBTA</b>	<b>XIRFADDA</b>
1	Beeraha/Xanaanada iyo Maaraynta Xoolaha/Kalluumaysiga/Hoyga xoolaha iyo hudheelada xayawaanka	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Shaqaalaha Beeraha</li> <li>- Shaqaalaha Xannaanada Xoolaha</li> <li>- Shaqaalaha beeraha digaaga</li> <li>- Shaqaalaha Kalluumaysiga</li> <li>- Shaqaalaha Beeraha Kaluumaysiga</li> <li>- Daryeeleyaasha Xoolaha</li> </ul>
2	Cunto Farsamaynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Shaqaalaha soo saara quudka xoolaha</li> <li>- Shaqaalaha rooti dubista iyo baddeecoyinka caanaha ee habbeenkii shaqeeya</li> <li>- Xoogsatada iyo Muruq-maalika Rara/Dejiya Alaabta</li> <li>- Shaqaalaha kawaanka digaaga ee habbeenkii shaqeeya</li> </ul>
3	Maareynta Qashinka	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Shaqaalaha bullaacadaha, qashinka, iyo nadifinta biyaha wasakhda ah</li> </ul>

		<ul style="list-style-type: none"> <li>- Shaqaalaha uruuriya ee warshadeeyaa qashinka</li> <li>- Shaqaalaha dib-u-warshadeeynta</li> <li>- Shaqaalaha uruuriya wasakhda xoolaha iyo wasakhda kawaanka</li> </ul>
4	Ganacsiga-Dayactireyaasha	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Shaqaalaha kaalinta batroolka iyo gaari dhaqida</li> <li>- Xoogsatada iyo Muruq-maalika Rara/Dejiya Alaabta</li> <li>- Shaqaalaha suuqa kalluunka</li> <li>- Shaqaalaha dayarcirka iyo rinjiyeynta gawaarida</li> </ul>
5	Adeeg Bixinta	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Shaqaalaynta shirkadaha nadiifadda sida shaqaalaha nadiifiya dhismeyaasha iyo aaggaga bannaanka ah</li> <li>- Shaqaalaha Dhejiya Agabka Xayaysiinta</li> <li>- Shaqaalaha Cuntada Gaarsiiya Macaamiisha</li> <li>- Shaqaalaha Nadaafadda Beeraha Jardiinada</li> <li>- Xoogsatada iyo Muruq-maalika Rara/Dejiya Alaabta</li> <li>- Shaqaalaha buufiya cayayaanka guryaha iyo xafiisyada</li> </ul>
6	Warshadaha cuntada / Hudheelada	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Kaaliyeyaasha jikada, nadiifiyeyaasha</li> <li>- Shaqaalaha Cuntada Gaarsiiya Macaamiisha</li> </ul>
7	Kale	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Shaqaalaha makiinadaha dharka lagu dhaqo</li> </ul>

Sidoo kale, macluumaadka iyo taageerada ku saabsan shaqooyinka, koorsooyinka luuqadeed iyo barashada xirfadaha waxaa laga heli karaa mareegta “*Help Refugees Work*” iyo iyadoo lagala xiriiraya:

- Iimaylka: [info@helprefugeeswork.org](mailto:info@helprefugeeswork.org)
- Telefoonka: 22205959
- WhatsApp/Viber: 97767329
- [www.helprefugeeswork.org](http://www.helprefugeeswork.org)

Mareegaha kale ee loogu talagalay shaqo-doonka:

- [www.ergodotisi.com](http://www.ergodotisi.com)
- [www.bazaraki.com/jobs-and-services/](http://www.bazaraki.com/jobs-and-services/)
- [www.cyprusjobs.com/](http://www.cyprusjobs.com/)
- [www.facebook.com/FindJobInCyprus/](http://www.facebook.com/FindJobInCyprus/)
- [www.facebook.com/cyprusjobmarket/](http://www.facebook.com/cyprusjobmarket/)

## 5. Iska Diiwaangelinta Xafiiska Shaqada

Marka codsadeyaasha ka gudbaan Pournara FRC ama ay ka baxayaan Xarunta Qaabilaadda iyo Hoyga ee "Kofinou" ama Xarunta Hoyga "Limnes" iyo kahor inta aysan codsan macaashyada bulsheed ee SWS, waa inay Xafiiska Shaqada isaga diiwaangeliyaan inay shaqo la'aan yihiin haddii ay dhacdo in aysan haysan wax shaqo ah, iyagoo gudbinaya dokumeentiyada soo socda:

- Buugga aqoonsiga
- Warqadda Xaqijinta
- Xaqijinta degganaanshaha (heshiiska guriga ama qaansheegta korontada ama biyaha iwm.)
- Cinwaanka iimaylka
- Lambarka telefoonka

Waxay dokumeentiyada kor ku xusan ugu gudbin karaan xafiiska shaqada ee gobolka si fool-ka-fool ah ama iimayl ahaan iyagoo u diraya ciwaanadan soo socda:

- Loogu talagalay dadka deggan Nicosia: [asylumnic@dl.mlsi.gov.cy](mailto:asylumnic@dl.mlsi.gov.cy)
- Loogu talagalay dadka deggan Larnaka: [asylumlca@dl.mlsi.gov.cy](mailto:asylumlca@dl.mlsi.gov.cy)
- [Loogu talagalay dadka deggan Limassol: asylumlim@dl.mlsi.gov.cy](mailto:asylumlim@dl.mlsi.gov.cy)
- [Loogu talagalay dadka deggan Paphos: asylumpaphos@dl.mlsi.gov.cy](mailto:asylumpaphos@dl.mlsi.gov.cy)
- [Loogu talagalay dadka deggan Ammochostos: asylumpar@dl.mlsi.gov.cy](mailto:asylumpar@dl.mlsi.gov.cy)

Dhammaan codsadeyaasha soo gudbiya dokumeentiyada khuseeya codsiga iimayl ahaan ayay jawaab-celin u heli doonaan. **Aad ayay muhiim u tahay in la raaco tilmaamaha saxda ah ee lagu sheegay iimaylka iyo in aan la seegin taariikhaha muhiimka ah**, tusaale ahaan taariikhaha gaarka ah marka la iska rabo inay tagaan Xafiiska Shaqada ama maalmaha gaarka ah ee ay tahay inay cusbooneysiistaan kaarka shaqo la'aanta. **Haddii ay ku guuldareystaan inay taasi sameeyaan ayna seegaan taariikh kasta oo muhiim ah, macaashyada bulsheed ee SWS way joogsan doonaan waxaana looga baahan doona inay mar kale codsasho bilaabaan.**

## 6. Codshada macaashyada Adeegga Daryeelka Bulshada

Codsadeyaasha aan dabooli karin baahida ay u qabaan agabka aasaasiga ah waxay xaq u leeyihiiin kaalmada daryeelka marka la eego shuruudaha gaarka ah ee Adeegga Daryeelka Bulshada.

Si loo codsado marka ugu horraysa macaashyada bulshada, codsaduhu waa inuu keenaa dokumeentiyadan soo socda Xafiiska Gobolka SWS; Cinwaannada dhammaan xafiisyada SWS ee gobolka waxaa laga heli karaa dhammaadka buug-yarahan.

- A. Loogu talagalay **xaqal jeebka**, waa la iska rabaa.
  1. Buugga aqoonsiga (Asal iyo Nuqluba)
  2. Warqadda xaqijinta (Asal iyo Nuqluba)
  3. \*Xaqijinta Shaqo La'aanta (dokumeentigan waxaa laga soo qaadan karaa Xafiiska Shaqada)
  4. Heshiiska kirada ama qaansheegta tamarta ee magaca codsadaha ku qoran.

- \* **FIIRO GAAR AH:** Xaqijinta shaqo la'aanta lagama maarmaan ma ahan 9-ka bilood ee ugu horreeya<sup>3</sup>. Marka muddada 9-ka bilood ah ay dhammaato, xaqijinta shaqo la'aanta ayaa la isaga baahan yahay si loo sii helo macaashka.
- B. Haddii ay dhacdo in codsaduhu uu magaciisa ku qoran yahay heshiiska kiro ah oo uu rabo inuu dalbado **xaqal jeeb** balse sidoo kale **taageerada kiro** ee ay bixiso SWS, taasoo si toos ah loogu diri doono mulkiilaha si lacagta ku habboon looga dhimo kirada billaha ah, waa inay keenaan dokumeentiyada soo socda:
1. **Heshiiska guriyeynta (Asal iyo nuqulba)**
    - (a) Waa inay ku qoran yihiiin magacyada iyo lambarrada ARC ee **dhammaan** kiraysteyaasha iyo **dhammaan** dadka ku nool guriga, **oo ay ku jiraan carruurta**.
    - (b) Waa inay ku qoran yihiiin magaca mulkiilaha oo buuxa, lambarka kaarka aqoonsiga, lambarka telefoonka, cinwaanka guriga oo buuxa.
    - (c) Waa inay ku qoran yihiiin qaddarta kirada billaha ah, muddada heshiiska, cinwaanka buuxa ee duddada/guriga.
    - (d) Waa inay saxiixaan **dhammaan kiraysteyaasha** iyo **2 markhaati** (oo ay ku qoran yihiiin magacyadooda oo buuxa, lambardooda aqoonsiga iyo lambardooda telefoonka)
    - (e) Haddii kirada sannadlaha ah ay ka badan tahay 5,000 oo yuuro, heshiisku waa inuu noqdo warqad ah oo uu ku shaabadeeyey madaxa bulshada ee deegaanka codsadayaashu deggan yihiiin.
  2. **Sabarloogada guriga**
  3. **Nuqulka Kaarka Aqoonsiga (ID) ee Mulkiilaha Guriga** (2 dhinacba)
  4. **Lamabraka IBAN ee Mulkiilaha Guriga** (Koontada Bangiga)
  5. **Qaansheegta KORONTADA ama biyaha** (waa inay ku qoran yihiiin cinwaanka iyo magaca)
  6. **Warqad qiraal ah oo ka socota mulkiilaha guriga** (lagu soo lifaaqo dhammaadka buug-yaraaha) taasoo qoraalka soo socda ay tahay in lagu qoro:
    - (a) "Waxaan caddeynayaa oo aan ballanqaadayaa in aan isla markiiba la socodsiin doono Adeegga Daryeelka Bulshada mar kasta oo isbeddel ku yimaado tirada kiraysteyaasha."
    - (b) Waa in la soo raaciyo a) Lambarka aqoonsiga (ID), b) AFM (lambarka Cashuurta libka) ee mulkiilaha, c) cinwaanka duddada, d) tirada qololka duddada, e) tirada saxda ah ee kiraysteyaasha / dadka ku nool duddada, f) hadduu gurigu leeyayah biyo iyo koronto.

Qaddarta Shuruudaha Aqbalaadda Agabka<sup>4</sup> ayaa la go'aamiyaa iyadoo lagu salaynayo tirada xubnaha qoyska; waa qaddarta ugu badan ee la bixiyo, xaalad kasta oo jirtana intaasi lama dhaafsiin karo:

---

<sup>3</sup> Sida ku cad Digreetada lambarkeedu yahay 312/2023 codsadayaashu waxaa loo oggol yahay inay shaqeeyaan 9 bilood kadib marka codsigooda la xareeyo.

<sup>4</sup> Maclumaaadka ku saabsan qaddarta la heli karo ayaa la cusbooneysiyyaa iyadoo la eegayo taariikhda rasmiga ah ee la qaaday ee ku jira mareegaha rasmiga ah <http://www.dmsw.gov.cy> markay tahay Luulyo 2023.

Tirada xubnaha qoyska	Cuntada, dharka, iyo kabaha	Korontada, biyaha iyo kharashaadka yaryar ee baxa marka heshiis kiro la soo bandhigayo	Korontada, biyaha iyo kharashaadka yaryar ee baxa marka heshiis kiro AAN la soo bandhigin
1	€186	€75	€28
2	€279	€100	€37
3	€372	€140	€52
4	€465	€170	€63
5 iyo wixii ka weyn/sare	€558	€200	€74

Tirada xubnaha qoyska	Kaalmada kirada				
	Nicosia	Limassol	Famagusta	Larnaca	Paphos
1	€100	€100	€100	€100	€100
2	€200	€218	€146	€174	€146
3 ilaa 4	€290	€317	€211	€252	€211
5 iyo wixii ka weyn/sare	€364	€397	€265	€315	€265

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah iyo wargelinada mustaqbalka ee la xiriira xaaladaha qaabilaadda fadlan booqo

<http://www.dmsw.gov.cy/dmsw/sws.nsf>All/49D92BCC787D3FC3C225835400437F15?OpenDocument>

Haddii codsadeyaashu ay macaashyo (ceyr) ka helaan Adeegyada Daryeelka Bulshada, ayna u baahan yihiin inay beddelaan cinwaanka gurigooda, aad ayay muhiim u tahay in si isbeddelkan loo sameeyo lala xiriyo Xafiisyada SWS, maadaama jeegaga macaashyada bulsheed loo sii diri doono cinwaankii hore. Si taasi loo sameeyo, codsadeyaashu waa inay booqdaan mid ka mid ah **Xafiisyada Daryeelka Gobolka (Regional Welfare Offices)** ayna bixiyaan:

- Buugga aqoonsiga (asal iyo nuqulba)
- Heshiiska Kirada (asal iyo nuqulba),
- Buuxi foomka codsiga ee ay shaqaalaha SWS siin doonaan codsadeyaasha.

#### **FIIRO GAAR AH: Macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan joojinta gunnada.**

Gunnada waa la joojinayaa haddii:

1. Codsaduhu la siiy aqoonsiga magangalyada caalamiga ah (oo markan oo kale wuxuu codsan doonaa EEE, fadlan eeg qeybta 6 – *Macaashyada daryeelka – EEE* oo hoos timaada “Xuquuqaha iyo Waajibaadyada loogu talagalay ka-faa'idaysteyaasha Magangelyada Caalamiga ah”).
2. Marka xaaladda codsaduhu ay meesha ka baxdo, taasoo bilaabanaysa maalinta codsaduhu go'aanka laga gaaray codsigeeda/codsigeeda ka helo adeegga magangelyada.
3. Marka codsadeyaashu ay ka tagaan aagga Jamhuuriyaddu ay maamusho wakhti kasta (oo ay ku jiraan booqashooyinka Aagga la haysto).

4. Marka codsaduhu xabsi ku jiro.
5. Marka codsaduhu aanu la shaqayn maamulka ama diido inuu wax maclumaad ah siiyo maamulka, oo ay ku jiraan Xafiiska Adeegyada Bulshada (Social Welfare Services).
6. Marka codsaduhu uu qariyo ilaha dhaqaale oo ay ku jiraan lacagaha xawaaladaha loogu soo diro.
7. Marka ay ku guuldareystaan inay si sax ah ugu sheegaan maamulka dakhliga ka soo gala shaqada ama ilaha kale. Ka sokow joojinta gunnada, tani waxay u horseedi kartaa in lagu soo oogo dacwad dembiyeed ah oo khiyaano ah oo codsadaha waxaa laga yaabaa in loo sheego inuu soo celiyo lacagta uu helay.

## [7. Samaysashada koonto bangi](#)

Codsadeyaasha si ay u helaan gunnooyinka macaashayada bulsheed ah waa inay leeyihiin koonto bangi.

Si uu u samaysto koonto bangi codsaduhu waa inuu booqdo laanta deegaanka ee uu rabo waana inuu dhiibo dokumeentiyada lagama maarmaanka ah.

### **Dokumeentiyada La Iska Rabo:**

- 1) Buugga Aqoonsiga.
- 2) Warqadda Xaqijinta.
- 3) Heshiiska Kirada.
- 4) Qaansheegta adeegyada daruuriga ah (korontada, biyaha, ama internet-ka).

## [8. Helitaanka Adeegyada Daryeelka Caafimaadka](#)

Codsadaha magangalyada caalamiga ah wuxuu heli karaa daaweyn bilaash ah.

Dadka soo galay Jamhuuriyadda wixii ka dambeeyay 02/05/2022 waxaa loo oggolyahay inay booqdaan isbitaallada dadweynaha iyo dhakhaatiirta iyagoo soo bandhigaya warqadda xaqijinta iyo buugga aqoonsiga muddo hal sano ah laga bilaabo maalinta codsigooda la xareeyo (waxay ku qoran tahay isla warqadda xaqijinta).

Kuwa soo galay Jamhuuriyada kahor 02/05/2022 ama marka ay dhammaato xaddidaada halka sano ah, waa inay codsadaan kaarka caafimaadka.

Kaararka Caafimaadka waxaa bixiya Wasaaradda Caafimaadka (Ministry of Health) oo ku taala xarunta dhexe ee magaalada Nicosia. Dadka ku nool degmooyinka kale, waxay ku dalban karaan kaadhka caafimaadka iimayl ahaan, sida hoos lagu sharraxay.

Dokumeentiyada ay tahay in la soo gudbiyo waa kuwan soo socda:

- foomka codsiga ee kaadhka caafimaadka ee ku lifaaqan dhammaadka buug-yarahan.
- Warqadda Xaqijinta.

Intii la sugayo qaadashada kaadhka caafimaadka, Wasaaradda Caafimaadku (Ministry of Health) waxay ku dhawaaqday in, laga bilaabo 2-da Maayo 2022, codsadaayaashu inay ka heli karaan daryeel caafimaad isbitaalada dadweynaha iyagoo soo bandhigaya Warqadda Xaqijinaysa Gudbinta Codsga Magangelyada Caalamiga (Confirmation of Submission of an Application for International Protection)

ah (Warqadda Xaqijinta). Siyaasadani waxay dhaqangeli doontaa hal sano kadib laga bilaabo taariikhda la soo saaray Warqadda Xaqijinta.

**Ogeysiis muhiim ah laga bilaabo Maayo 2023:** Codsadeyaasha aan si fool-ka-fool ah u aadi karin Wasaaradda Caafimaadka (Ministry of Health) ee Nicosia si ay u codsadaan kaarka caafimaadka, hadda waxay kaarka u codsan karaan si dhijitaal ah iyagoo u soo diraya iimayl [asylummed@moh.gov.cy](mailto:asylummed@moh.gov.cy) si ay boostada uga helaan kaarka caafimaadkooda. Gudaha iimaylka, waa inay soo raaciyaan macluumaadka soo socda:

- foomka cogsiga oo dhamaystiran oo uu ku qoran yahay cinwaan buuxa oo sax ah.
- nuqulka Warqadda Xaqijinta
- Nuqulka Shahaadada Diiwaangelinta Shisheeyaha (Alien Registration Certificate, ARC)
- nuqulka racfaanka, haddii la dabaqi karo

## 9. Habraacyada iyo ballamaha loogu talagalay dhallaanka cusub

Haddii aad uur leedahay, habraacan waa in la raaco:

### 1. Kadib dhalmada iyo marka laga soo laabanayo Isbitaalka:

- Waalidiintu waa inay xafidaan dhammaan dokumeentiyada uu siiyo isbitaalka (dokumeentiyada ka-saarista isbitaalka, buug-yaraha caafimaadka ilmaha, iwm.) maadaama dokumeentiyadan loo baahan yahay marka la bixinayo shahaadada dhalashada.

### 2. Ballamaha in la aado ay tahay:

- Baaritaanka Dhakhtarka Carruurta
- Baaritaanka Maqalka
- Baaritaanka Dhakharka Haweenka ee loogu talagalay hooyada 40 maalmood kadib dhalmada
- Marka dhallaanku 2 billood jiro, ballanta loo qorsheeyo tallaalka 1-aad.

\* Macluumaad ku saabsan sida loo qabsan karo ballamaha waxaa laga heli karaa dokumeentiyada uu isbitaalku siiyo waalidka, marka laga saarayo isbitaalka.

### 3. Shahaadada Dhalashada:

- Waalidiintu waa inay tagaan Maxkamadda Degmada (District Court) si ay u soo qaataan **Warqadda Caddeynta**, si ay u caddeeyaan in hooyadu aan la qabin ama si ay u sheegto aabbaha ilmaha haddii aysan haysan shahaado guur Looma baahna in ballan la qabsado. Laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 1:00 duhurnimo.
  - \* Haddii aad haysato shahaado guur, fadlan si toos ah ugu sii gudub tallaabada xigta.
- Waalidiintu waa inay tagaan Xafiiska Degmada ama Xarumaha Muwaadiniinta (ballan looma baahna in la qabsado, laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 1:00 duhurnimo) si loogu soo saaro **Shahaadada Dhalashada**, iyagoo wata dokumeentiyadan soo socda:
  - Warqadaha Xaqijinta.
  - Buugaagta Aqoonsiga.
  - Caddaynta/Shahaadada Guurka.
  - Ku-sugta Dhalashada ee isbitaalku bixiyo.

#### **4. Socdaalka iyo Hayaanka**

Waalidiintu waa inay la booqdaan iyagoo wata dhallaankooda cusub, Xafiiska Adeegyada Socdaalka si loogu soo saaro:

1. Warqadda Xaqijinta
2. Buugga aqoonsiga

Haddii hooyada loo aqoonsado qaxooti ahaan, waa inay soo booqataa Xafiiska Adeegga Magangalyada (Asylum Service) iyadoo wadata dhammaan dokumeentiyada kor ku xusan, si ilmaha cusub loogu daro go'aanka la gaarayo. Kadib, waa in ballan lagaaga qabto qaybta "Hayaanka" ee ku taala Nicosia si aad u codsato in laguu soo saaro ruqsadda degganaanshaha ilmaha.

#### **5. Kaarka Caafimaadka haddii ay kuu dhashaan dhallaan cusub**

Marka warqadda dhalashada la diyaariyo, waalidiintu waa inay booqdaan Wasaaradda Caafimaadka ee Nicosia si ay u helaan kaar cusub oo uu magaca dhallaanku ugu dul qoran yahay, qof kugu tiirsan ahaan. Nuqulka shahaadada dhalashada waa in lagu soo lifaaqaa codsiga. Haddii kale, waalidku wuxuu si dhijitaal ah ugu codsan karaa iimaylka, sida lagu qeexay qeybta 3-aad.

#### **10. Raadinta Guri**

Markaad raadinayso guri/duddo, mareegaha iyo kooxaha soo socda ayaa ku caawin kara:

- [www.bazaraki.com](http://www.bazaraki.com)
- Facebook.com – Suuqa Guryaha
- Facebook.com – Kooxaha (sida "Rent in Cyprus", "Cyprus Helping Refugees" iwm.)
- <https://www.spitogatos.com.cy/en/property-to-rent>
- [www.foxrealty.com.cy](http://www.foxrealty.com.cy)
- <https://incyprusproperty.com/property-status/for-rent/>
- <https://www.spiti24.gr/en/to-rent/property/cyprus>
- [https://foxrealty.com.cy/properties/for\\_rent/](https://foxrealty.com.cy/properties/for_rent/)

#### **11. Helitaanka Waxbarasho**

Waxbarashada Qubrus waa lacag la'aan ilaa laga dhammeeyo dugsi sare (Lyceum). Waxay ka kooban tahay 3 muddo oo Dugsi Hoose ah (6 sanno), Dugsi Dhexe (Gymnasium, 3 sanno), Dugsi Sare (Lyceum 3 sanno).

Dhammaan carruurta, da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 18 sanno jir, waxay xaq u leeyihii inay si lacag la'aan ah ku dhigtaan dugsiyada ku yaala Jamhuuriyadda Qubrus, iyadoon loo eegayn muwaadinimada, jinsiga, ama xaaladda socdaal.

Gudaha Jamhuuriyadda Qubrus xaadiritaanka dugsigu waa ku waajib carruurta da' dugsiyeedka gaadhay. Haddaba, waalidiinta/daryeeleyaasha waxaa ku waajib ah inay carruurtooda ka diiwaangeliyaan dugsiga. Haddii kale, Booliska iyo/ama Xafiiska Adeegga Bulshada (Police and/or Social Welfare Service) ayaa soo faragelin doona oo qiimeyn doona xaaladda.

### **Habraaca Iska Diiwaagelinta Dugsiga:**

#### **1) Loogu talagalay Dugsi-horaadka & Dugsiga Hoose-Dhexe:**

- Waalidiintu waa inay buuxiyaan foomka YPANDDE11 (waxaa laga heli karaa <http://www.moec.gov.cy/dde/entipa.html>), iyagoo ku soo lifaaqaya nuqullada dokumeentiyada taageeraya codsiga waana inay u soo gudbiyaan Xafiiska Waxbarashada Degmada ee dhex ku yaala Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education).
  - Dokumeentiyada Taageeraya Codsiga:
    - a) shahaadada dhalashada/ buugga aqoonsiga/lambarka ARC
    - b) Heshiiska kirada
    - c) Qaansheeg uu ku qoran yahay magaca degganaha (qaansheegta korontada).

#### **2) Loogu talagalay Dugsiga Sare (Jaamacad-horaad & Afar Sanno Dusi Sare ah):**

- Waalidiintu waa inay buuxiyaan Codsiga Diiwaangelinta/Wareejinta Ardayga ee DMGE 02 ee laga heli karo halkan: <http://www.moec.gov.cy/dme/entypa.html>, iyagoo ku lifaaqaya dokumeentiyada taageeraya codsiga una gudbinaya Xafiiska Waxbarashada Degmada ee ku dhex yaala Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education).
  - Dokumeentiyada Taageeraya Codsiga:
    - a) shahaadada dhalashada/ buugga aqoonsiga/lambarka ARC
    - b) Heshiiska kirada
    - c) Qaansheeg uu ku qoran yahay magaca degganaha (qaansheegta korontada).

Dokumeentiyada waa in loo gudbiyaa Xafiiska Waxbarashada Degmada ee ku dhex yaala Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education):

<b>Cinwaanka Boostada</b>	<b>Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education)</b> Kimonos and Thoukydidou Corner Akropoli, 1434 Lefkosia Lambarka telefoonka: 22800600/700 liimaylada: <a href="mailto:registry@moec.gov.cy">registry@moec.gov.cy</a> iyo <a href="mailto:moec@moec.gov.cy">moec@moec.gov.cy</a>
-------------------------------	--

## QEYBTA 2: Xuquuqaha iyo Waajibaadka ka-faa'iidaystaha magangelyada caalamiga ah (Xaaladda Qaxoontinimo iyo Magangelyo Hoosaadka) (Refugee Status and Subsidiary Protection)

### 1. Ka-faa'iidaysteyaasha magangelyada caalamiga ah

Ka-faa'iidaysteyaasha magangelyada caalamiga ah waxay heli karaan laba nooc oo xaalad magangelyo ah:

1. Magangelyo-hoosaad.
2. Qaxooti.

Labada xaaladoodba ka-faa'iidaysteyaashu waxay xaq u leeyihii xuquuqo kala duwan oo si siman u khuseeya muwaadiniinta Qubrus.

Tilmaam ahaan, ka-faa'iidaysteyaasha magangelyada caalamiga ah waxay ku raaxaystaan:

1. Helitaanka nidaamka waxbarashada guud iyo tababar dheeraad ah ama barnaamijyada dib-u-tababarka.
2. Xuquuqda aqoonsiga shahaadooyinka waxbarasho, diblomooyinka, shahaadooyinka heerka koowaad ee jaamacadda ee qalaad.
3. Xuquuqda helitaanka si bilaashka ah Maxkamadaha Jamhuuriyadda (Courts of the Republic) iyo sidoo kale ka-dhaafitaanka shuruudaha dammaanadda bixinta kharashaadka garsoorka.
4. Xuquuqda sahayda cunto marka ay jiraan xaaladaha degdegga ah.
5. Xuquuqda ilaalinta hantida garaadka.
6. Xuquuqda ka qayb qaadashada barnaamijyada waxbarasho ee dadka waaweyn ee la xidhiidha arrimaha shaqada, tababarada xirfadeed oo ay ku jiraan koorsooyinka tababareed ee kor loogu qaado xirfadaha, waayo-aragnimada goobta shaqo ee dhabta ah iyo adeegyada la-talinta ee ay bixiyaan xafiisyada shaqo.
7. Taageerada gaarka ah (bulsheed iyo caafimaadka) ee loogu talagalay dadka nugul.
8. Xuquuqda lagu wareejinayo hanti taala Jamhuuriyadda Qubrus.
9. Xuquuqda in loola dhaqmo si caddaalad ah iyadoon la eegayn jinsiga, isirka, diinta, xubin ka ahaanshaha koox bulsheed gaar ah, ra'yiga siyaasadeed, ama dalka qofku ka soo jeedo/u dhashay.
10. Xuquuqda in si xor ah loogu muujiyo oo loogu dhaqmo caqiidada diimeed.
11. Xuquuqda kaqaybgalka barnaamijyada isdhexgalka bulsheed.

### 2. Xuquuqaha iyo Waajibaadka Kale

#### 2.1 Ruqsadda Degganaanshaha

Marka codsaduhu helo go'aan fiican/togan, ka-faa'iidaysteyaasha magangelyada caalamiga ah waxay xaq u leeyihii ruqsadda degganaanshaha, iyadoo ku xiran heerka magangelyo ee ay heleen. Heerka qaxoontinimo wuxuu leeyahay sharci ama ruqsad degganaansho oo 3-sanno ah, waa la cusbooneysiin karaa marka uu dhaco, oo Heerka Magangelyo-hoosaadka wuxuu leeyahay sharci degganaansho oo 1 sanno ah, la cusbooneysiin karo marka uu dhaco.

#### 2.2 Codsiga ruqsadda degganaanshaha

Si loo siyo sharciga degganaanshaha ka-faa'iidaysteyaasha waa in ay soo gudbiyaan dokumeentiyada soo socda oo dhan:

1. Foomka MIPA2, oo ay bixiso Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Ministry of Interior), si habboon loo buuxiyay, oo saxiixan.
2. Warqadda Xaqijinta
3. Buugga aqoonsiga
4. Go'aanka CAS
5. Nuqulka baasaboorka (haddii la heli karo)
6. Xaqijinta cinwaanka (heshiiska ama qaansheegta adeegyada daruuriga ah ee magacaaga ku qoran)

### 2.3 Halka codsiga la geeyo.

Ka-faa'iidaysteyaasha magangelyada caalamiga ah waa inay sharciga degganaanshaha ka codsadaan cinwaanadan soo socda (waxay ku xirantahay gobolka ay deggan yihiin).

GOOBTA	XIRIIRADA
<b>Nicosia - Waaxda Diiwaangelinta Madaniga iyo Socdaalka (Civil Registry and Migration Department)</b>	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> Archbishop Makarios III Avenue, 90, 1077, Nicosia <b>Telefoonka:</b> 22308808, 22308811</p> <p><b>Iimaylka:</b> <a href="mailto:migration@crmd.moi.gov.cy">migration@crmd.moi.gov.cy</a></p> <p>Saacadha shaqo: 8 subaxnimo – 2.30 galabnimo</p>
<b>Larnaca – Asylum Immigration Unit (Qaybta Socdaalka Magangelyada)</b>	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 34, Tassos Mitsopoulos Avenue, Makenzy, 6927</p> <p><b>Telefoonka:</b> 24-804233 / 24-804223 / 24-804231</p> <p><b>Iimaylka :</b> <a href="mailto:aidlarnaca@police.gov.cy">aidlarnaca@police.gov.cy</a></p> <p>Saacadha shaqo: 7.30 subaxnimo – 2.30 galabnimo</p>
<b>Limassol – Asylum Immigration Unit (Qaybta Socdaalka Magangelyada)</b>	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 223, Franklin Roosevelt Street, Nicolaou Building, 2d Floor, 3046.</p> <p><b>Telefoonka:</b> 25-805210 / 25-805212 / 25-805650.</p> <p><b>Iimaylka :</b> <a href="mailto:aidlimassol@police.gov.cy">aidlimassol@police.gov.cy</a></p> <p>Saacadha shaqo: 7.30 subaxnimo – 2.30 galabnimo</p>
<b>Paphos – Qaybta Socdaalka Magangelyada (Asylum and Immigration Unit)</b>	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 22, Corner Kaningos and Eleftheriou Venizelou, Nicolaou Court, 8021.</p> <p><b>Telefoonka:</b> 26-806222 / 26-806214 / 26-806211 / 26-806215.</p>

	<p><b>limaylka:</b> <a href="mailto:aidpafos@police.gov.cy">aidpafos@police.gov.cy</a></p> <p>Saacadha shaqo: 7.30 subaxnimo – 2.30 galabnimo</p>
<b>Famagusta- Qaypta Socdaalka Magangelyada (Asylum Immigration Unit)</b>	<p><b>Cinwaanka iyo Waddada Boostada:</b> 83, Eleftherias Avenue, TAPOLOS BLD, 1st Floor, 5380,</p> <p><b>Telefoonka:</b> 23803280 Fakiska: 23811308</p> <p><b>limaylka:</b> <a href="mailto:aidfamagusta@police.gov.cy">aidfamagusta@police.gov.cy</a></p> <p>Saacadha shaqo: 7.30 subaxnimo – 2.30 galabnimo</p>

### 3. Xuquuqda safarka

Ka-faa'iidaysteyaasha Magangelyada Caalamiga ah waa loo oggol yahay inay safraan, iyadoo ay ku xiran tahay inay helaan dokumeentiyada lagama maarmaanka ah, iyo fiiso (haddii loo baahdo) ay ku galaan wadanka ay rabaan inay u safraan.

**FIIRO GAAR AH:** Haddii ka-faa'iideystaha magangelyada caalamiga ah uu damco inuu safro, isaga/iyada waa inay sidaasi sameeyaan iyagoo maraya goobaha SHARCIGA ah ee laga soo gal/o/laga baxo ee ku yaala Jamhuuriyadda. Dhex marida deegaanada la haysto waa MAMNUUC.

**DIGNIIN:** U safrida dalkaagii hooyo ayaa laga yaabaa inay sababto habraac keeni kara in lagaala noqdo magangelyada.

Haddii ka-faa'iidaystaha magangalyada caalamiga ah aanu haysan baasaboor qaran, isaga/iyada ayaa codsan kara in loogu soo saaro dokumeentiyada safarka sida soo socota:

Dadka haysta aqoonsiga qaxoontiga waxay xaq u leeyihiin baasaboorka qaxootiga ee ay bixiso Dawladda Qubrus waana mid ay aqbalaan wadamada oo dhan. Baasaboorka qaxootiga wuxuu shaqaynayaa 5 sanno, sharciga degganaanshahana waa 3 sanno.

Dadka haysta magangelyo-hoosaadka waxay isticmaali karaan baasaboorkooda qaranka si ay ugu safraan. Haddii ay dhacdo in ka-faa'iidaystaha magangelyo-hoosaadka aanu haysan baasaboor qaran, isaga/iyada ayaa codsan karaa in la soo saaro dokumeenti socdaal (*laissez passer*).

Codsiyada waa in loo gudbiyo cinwaanada sare lagu xusay waana inay la wehliyan dokumeentiyada soo socda:

1. Foomka MTD-IPA2, si buuxda loo buuxiyay oo saxiixan.
2. Go'aanka CAS.
3. Buugga Aqoonsiga.
4. Sharciga Deggenaanshaha oo Ansax ah
5. 2 sawirro Baasaboor.

**FIIRO GAAR AH:** Ka-faa'iidaysteyaasha waxaa laga yaabaa in loo sheego inay bixiyaan xogtooda gaarka ah (faraha, dhererka, saxiixa, iyo sawirro jireed, sida uu sharcigu dhigayo)

Lacagta lagu soo saaro dokumeentiyada socdaalku waa 90 yuuro midkiiba.

Dhammaan macluumaadka muhiimka ah ayaa sidoo kale laga heli karaa halkan oo ah barta internet-ka ee Waaxda Socdaalka iyo Diiwangelinta Madaniga (Civil Registry and Migration Department):

[http://www.moi.gov.cy/moi/crmd/crmd.nsf/home\\_en/home\\_en?openform](http://www.moi.gov.cy/moi/crmd/crmd.nsf/home_en/home_en?openform)

#### 4. Xuquuqda dib-u-mideynta qoyska

**Qaxootiga la aqoonsan yahay oo keliya** ayaa ku raaxaysanaya xaqa dib-u-mideynta qoyska. Xubnaha qoyska (sowjada/sayga qaxootiga ah, carruurta aan qaangaarka ahayn oo aan la guursan iyo haddii ay dhacdo ilmo yar oo keligiis ah oo qaraabo koowaad la ah) qof qaxooti ah oo awoodi waayay inay soo raacaan isaga/iyada markay soo galayeen Jamhuuriyadda, dib ayaa loogula mideyn karaa isaga/iyada gudaha Jamhuuriyada haddii iyada/isaga ay codsadaan oo la xaqijiyo xiriirka ka dhxeeyaa. Waaxda mas'uulka ka ah baaritaanka codsiyada dib-u-mideynta qoyska waa Waaxda Socdaalka iyo Diiwangelinta Madaniga (Civil Registry and Migration Department). (Cinwaanada kor lagu bixiyay)

#### 5. Xuquuqda shaqo

Ka-faa'iidaysteyaasha magangelyada caalamiga ah waxaa loo oggolyahay inay ka shaqeeyaan goob kasta oo ay qabtaan shaqo kasta oo ay rabaan ha ahaato mid la shaqaalaysiyo ama mid iskaa u shaqeysi ah. Looma baahna oggolaansho shaqo oo gaar ah.

Xaddidaaduhu waxay ka jiraan oo keliya dhinacyada la xiriira amniga qaranka iyo amniga guud.

#### 6. Macaashyada daryeelka- EEE

Sharci ahaan qof kasta oo dakhligiisa iyo ilaha kale ee dakhli ee soo gala ay ku filnaan waayaan buuxinta baahidiisa aasaasiga ah iyo kuwa gaarka ah, sida sharcigu qeexayo, wuxuu raadsan karaa inuu helo dakhliga ugu hooseeya ee la dammaanadqaado (halkan kadib loogu yeeri doono EEE), kaasoo loo bixiyo taageero maaliyadeed iyo/ama adeegyo ahaan.

Si ay xaq ugu yeeshaan ka-faa'iidaysteyaasha daqliga ugu hooseeya ee la dammaanadqaado ee magangelyada caalamiga ah waa inay u buuxiyaan qaar ka mid ah shuruudaha maaliyadeed iyo shuruudaha kale sida soo socota:

1. U yahay shaqo la'aan **si aan ikhtiyaari ahayn**.
2. Wadarta dakhliyeed ee qoyska waa inay ka yaraato wadarta guud ee baahida qoysku qabo sida la xisaabiyay iyadoo lagu salaynayo dakhliga ugu hooseeyo ee la damaanadqaado.

Shuruudo kale ayaa lagu dabaqay, oo ay ku jiraan mulkiiliyada hantiyeed ee ugu sarreysa iyo dhigaalka lacagta cadaanka ah ee ugu sarreysa.

##### 6.1 Qaddarta ay ku deeqday EEE:

Lacag caddaan ah:

1. 480 yuuro oo loogu talagalay ka-faa'iidayste kasta
2. 240 yuuro oo loogu talagalay dadka isqaba iyo xubin kasta oo qoyska ka tiran oo ka weyn 14 sanno jir
3. 144 yuuro oo loogu talagalay xubin kasta oo qoyska ka tiran oo ka yar 14 sanno jir

Kaalmada kirada:

Qaddarta ugu sarreysa ee loogu talagalay bixinta guriyeynta ayaa u tixgelisa tirada qoyska iyo dadku waxa ay kala yihiin sidoo kale gobolka degganaanshaha sida soo socota:

1. Qof kelli ah ama xaas carruur leh Nicosia Famagusta Limassol €154 Larnaca €134.75 Paphos €96.25.
2. Lamaane leh 1 ilmo ah ama 2 carruur oo isku jinsi ah oo aan qaangaar ahayn Nicosia Famagusta Limassol €224 Larnaca €196 Paphos €140.
3. Waalid kelli ah oo leh hal ilmo ah Nicosia, Famagusta Limassol €224 Larnaca €196 Paphos €140.
4. Lamaane leh 1 ilmo ah oo gaangaar ahayn iyo 1 ilmo oo qaangaar ah Nicosia, Famagusta Limassol €280 Larnaca €245. Paphos €175.
5. Lamaane leh 3 carruur ah oo aan qaangaar ahayn Nicosia, Famagusta Limassol €280 Larnaca €245 Paphos €175.
6. Qofka naafada ah €70 oo Dheeraad ah €61.25 oo Dheeraad ah €43.75 oo Dheeraad ah (Degmo Walba.)
7. Qoysaska tirada badan €56 oo Siyaado ah €49 oo Siyaado ah €35 oo Siyaado ah (Degmo Walba).

#### 6.2 Sida loo codsado.

Si ay u codsadaan EEE ka-faa'idaysteyaasha waa in ay soo gudbiyaan dokumeentiyada soo socda.

1. Foomka EEE3.v2, si sax ah loo buuxiyay oo saxiixan.
2. Lambarka Aqoonsiga (ID) ama ARC
3. Go'aanka fiican/togan ee CAS.
4. Shahaadada dhalashada ee ilmaha aan qaangaarka ahayn ee aan aqoonsiga (ID) lahayn.
5. Lambarka IBAN
6. Warbixinta xisaabaadka ee koontooyinka uu leeyahay codsadaha ama xubnaha qoyskiisa/keeda.
7. Heshiisyada shaqo (haddii la heli karo) ee sannadaha la joogay Jamhuuriyadda Qubrus.
8. Heshiiska kirada.
9. Ruqsadda/sharciga degganaanshaha.
10. Shahaadada dhigashada dugsiga ee ilmaha aan qaangaarka ahayn.

Lacalla hadduu ka-faa'idaystuhu codsanayo kabka kirada waa inuu sidoo kale bixiyo lambarka IBAN ee mulkiileyaasha guriga

#### 6.3 Halka codsiga la geeyo.

Ka-faa'idaysteyaasha waa inay codsigooda u soo gudbiyaan Xafiiska Maamulka Adeegga Daryeelka:

46, Themistokli Dervi, MEDCON Tower, 1066 Nicosia

Telefoonka.: 22 803030 Fakiska: 22 22803048

limaylka: [eee@mlsi.gov.cy](mailto:eee@mlsi.gov.cy)

#### 6.4 Waajibaadka ka-faa'idaystaha

Ka-faa'idaystaha EEE waa inuu ixtiraamo waajibaadyada soo socda:

1. Waa inuu uga diiwaangashan yahay qof shaqo la'aan ah ahaan Degelka Shaqada iyo Shaqaalaha
2. Waa inuu aqbalo shaqo loogu soo bandhigay iyadoo lagu salaynayo xirfadaha isaga/iyadu leeyihiin.
3. Waa inaan si ikhtiyaar ah uga tagin shaqadiisa/shaqadeeda muddo lix bilood ah kahor inta uusan codsan EEE, ama kadib codsiga ama haddii isaga/iyadu ay heleen EEE-ga.
4. Waa inuu ka qayb qaato barnamijyada tababarka xirfadeed marka laga codsado
5. Waa inuu aqbalo booqashooyinka shaqaalaha dawladeed ee idman ee lagu qabanayo goobta iyada/isaga ay deggan yihiin.
6. Waa inuu aqbalo faragelinta bulsheed ee Shaqaalaha Bulshada ee dawladeed
7. Waa inuu si dhakhso ah ugu soo sheego maamulka haddii ay yimaadaan isbeddello ka dhan ah codsiga asalka ah tusaale. Dhalashada ilmo, furitaan, dakhli cusub, dakhli-beel.

FIIRO GAAR AH: Haddii ka-faa'iidaystuhu ku guuldareysto inuu u hoggaansamo waajibaadka kor ku xusan, Wasaaraddu waxay xaq u leedahay inay joojiso bixinta EEE ama macaashyo kasta oo kale si aan ikhtiyaar ahayn iyadoo aan bixin wax ogeysiis ah.

Dhammaan macluumaadka muhiimka ah ayaa sidoo kale laga heli karaa mareegta Dakhliga Ugu Hooseeya ee La Damaanadqaado:

[http://www.wbas.dmsw.gov.cy/dmsw/ydep.nsf/grands01\\_el/grands01\\_el?OpenDocument](http://www.wbas.dmsw.gov.cy/dmsw/ydep.nsf/grands01_el/grands01_el?OpenDocument)

## 7. Xuquuda caafimaad

Qofka xaq u leh magangelyada caalamiga ah waa inuu iska diiwaangeliya Nidaamka Caafimaadka Guud (General Health System, GESY) si uu si buuxda ugu raaxaysto xaq u leeyahay daaweynta lacag la'aanta ah.

Iyadoo loo marayo GESY ka-faa'iidaysteyaasha waxay ku raaxaystaan helitaanka xirfadleyaal caafimaad oo badan, adeegyo iyo daawooyin lacag la'aan ah ama lacag yar laga bixiyo.

Codsiga diiwaangelinta ee Diiwaanka Ka-faa'iidaystaha ee GHS waxaa lagu soo gudbiyaa onlayn iyadoo loo marayo Degelka Ka-faa'iidaystaha ee ku jira barta [Геси \(gesy.org.cy\)](http://gesy.org.cy)

Talaabada ugu horreysa ee lagu galo degelka la sheegay waa in la **samaysto akoon iyadoo loo marayo mareegta HIO lagana shaqaysiinaya**.

Cidda la danaynaya ayaa markaa lagu xiraa Degelka Ka-faa'iidaystaha (Beneficiary Portal) wuxuuna u sii gudbaa diiwaangelinta iyadoo la raacayo tilmaamaha ku qoran shaashadda. Geedi-socodka diiwaangelinta ayaa uga baahan cidda la danaynaya inuu buuxiyo goobo gaar ah si looga aqoonsado Diiwaanka horay loo xusay iyo sidoo kale macluumaad dheeraad ah (tusaale, cinwaanka, lambar telefoon oo lagala xiriiro iwm.)

Haddii qofka aan laga dhex aqoonsan karin Diiwaanada isaga/iyada waxaa loo sheegi doonaa inuu soo gudbiyo codsiga diiwaangelinta ka-faa'iidaystaha ee onlaynka ah oo ay tahay inuu soo gudbiyo kadibna daabaco oo boostada ugu diro Ururka Caymiska Caafimaadka (Health Insurance Organization) iyadoo lagu soo lifaaqayo shahaadooyin iyo/ama caddaymo gaar ah.

Dadka aan heli karin khad internet way isdiiwaangelin karaan iyagoo gacan ka helaya cid saddexaad oo akoon ku leh Degelka Ka-faa'iidaystaha iyadoo geedi-socodka la samayn doono marka oggolaansho laga helo cidda la danaynaya.

Dadka aan heli karin khad internet waxaa loo diiwaangelin karaa ka-faa'iidayste ahaan iyagoo booqanaya dhakhtarka gaarka ah ee ay doortaan. Inta lagu gudajiro booqashada dhakhtarkooda gaarka ah ayaa buuxin doona codsiga diiwaangelinta ka-faa'iidaysteyaasha isagoo ka wakiil ah cidda la danaynaya. Waa in la ogaado inta lagu gudajiro booqashada gaarka ah in cidda la danaynaya uu ka dhammeystiri karo diiwaangelinta gudaha Liiska dhakhtarka ee gaarka ah.

Diiwaangelinta kadib, ka-faa'iidaysteyaasha waa in laga diwaangeliyo dhakhtarka gaarka ah ayna doortaan sida ku cad diiwaanka ku habboon ee ku jira degelka.

Inta lagu gudajiro booqashada ugu horreysa dhakhtarka gaarka ah ayaa buuxin doona/xaqijin doona macluumaadka gaarka ah ee ka-faa'iidaystaha oo labada dhinacba way saxiixi doonaan Foomka Oggolaanshaha ee Laba Dhinaclaha ah ee dhakhtarka gaarka ahi u diri doono Ururka Caymiska Caafimaadka wakhti macquul ah gudaheeda. Intaas waxaa dheer, dhakhtarka gaarka ah ayaa siin doona ka-faa'iidaysteyaasha lambar gaar ah, marka loo geeyo iimaylka ku habboon ee ka-faa'iidaysteyaasha heli doonaan, waxay siin doontaa ka-faa'iidaystaha diiwaanadiisa/diiwaanadeeda ka-faa'iidayste ahaan.

## 8. Kharashka ku baxa GESY

Ka-faa'iidaysteyaasha inkastoo ay ku qasban yihiin inay bixiyaan kharashka GESY iyadoo ku xiran dakhligooda waxaana la xisaabiyyaa iyadoo la adeegsanayo sicir go'an oo dhan 5.5% ee mushaarka guud ee shaqaalaha iyo 4% mushaarka guud ee dadka iskooda u shaqaysta.

Sidoo kale, dallacaadaha soo socda ayaa<sup>5</sup> la dabaqi karaa:

Adeegyada Daryeelka Caafimaadka (Qoraalka 1-aad)	Qaddarta Lacagta Go'an ee Caymiska € (yuuro)
Baddeecad kasta oo daawo ah	<b>1.00</b>
Qalab kasta ama sahay kasta oo caafimaad	<b>1.00</b>
Baaritaan kasta oo shaybaar ama baaritaano kasta oo shaybaar * (qoraalka 2-aad)	<b>1.00</b>
Booqasho kasta oo kalkaaliso ama umuliso	<b>6.00</b>
Adeeg kasta oo bulsheed ee uu bixiyo dhakhtar ku takhasusay cilimiga raajada/baarithaanada raajada	<b>10.00</b>
Booqasho kasta oo xirfadleyaasha caafimaadka ee isbahaysiga nala leh	<b>10.00</b>

<sup>5</sup> Xogta waxaa laga soo qaatay mareegta rasmiga ah ee GESY <https://www.gesy.org.cy>

Adeegyada Daryeelka Caafimaadka (Qoraalka 1-aad)	Qaddarta Lacagta Go'an ee Caymiska € (yuuro)
Booqasho kasta oo isbitaal si loo helo adeegyada daryeelka caafimaad haddii ay shilal ama xaalado degdeg ah dhacaan	<b>10.00</b>

FIIRO GAAR AH 1: Wax lacagta go'an ee caymiska ah lama bixiyo marka adeegyada daryeelka caafimaadka la bixiyo iyadoo la tixgelinayo xaaladda daryeelka caafimaadka ee bukaan-jiifka.

FIIRO GAAR AH 2: Wadarta kharashka ugu hooseeya ee qayb kasta oo baaritaanada shaybaar ah waa tobani yuuro (€ 10.)

Tirada ugu sarreysa ee lacagaha go'an ee sannadlahaa ah ayaa loo dejin doonaa ka-faa'iidayste kasta si loo ilaaliyo kooxaha nugul (tusaale, dadka dakhligoodu hooseeyo iyo/ama dadka qaba baahiyaha sii kordhaya ee daryeelka caafimaadka) iyo si loo ilaaliyo helitaanka aan la xannibin ee dadweynaha ee adeegyada daryeelka caafimaadka lagama maarmaanka ah.

**Tirada ugu sarreysa ee lacagaha go'an ee sannadlahaa ah waxay ku noqon doontaa € 75 dadka qataa Dakhliga ugu hooseeya ee la dammaanadqaado, dadka hawlgabka ah iyo carruurta da'doodu tahay 21 jir, iyo €150 dadka intiisa kale.**

## 9. Xuquuqda Waxbarasho

### 9.1. Carruurta iyo dhalinta

Waxbarashada Qubrus waa lacag la'aan ilaa laga dhammeeyo dugsi sare (Lyceum). Waxay ka kooban tahay 3 muddo oo Dugsi Hoose ah (6 sanno), Dugsi Dhexe (Gymnasium, 3 sanno), Dugsi Sare (Lyceum 3 sanno)

Sharci ahaan, carruurta da'doodu u dhaxayso 6 iyo 15 jir waa inay dhigtaan dugsiga, iyadoo aan la eegin xaaladdooda sharchiyeed. Ku guuldareysiga waalidku inuu carruurtiisu ka diiwaangeliyo dugsiga waxay horseedi kartaa cawaaqib sharchiyeed oo daran.

Carruurtu waxaa laga diwaangeliya dugsiyada u dhow halka ay deggan yihin, ama haddii ay jiraan arrimo halis ah iyadoo la codsanayo in laga diiwaangeliyo dugsi ku yaala meel kale marka ay oggolaato Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education).

### Dokumeentiyada La Iska Rabo:

#### 1. Loogu talagalay dugsiga hoose

- Foomka DDE11 (halkan laga heli karo <http://www.moec.gov.cy/dde/entipa.html>)
- Shahaadada dhalashada/ Baasaboorka ama Sharciga degganaanshaha / Dokumeentiga safarka ee Baasaboorka Qaxooniga ama Ruqsadda Degganaanshaha Qaxootiga ee La Aqoonsan Yahay
- Heshiiska kirada.
- Qaansheeg uu ku qoran yahay magaca degganaha (qaansheegta korontada).

Dokumeentiyada waa in loo gudbiyaa Xafiiska Waxbarashada Degmada ee ku dhex yaala Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education).

2. Loogu talagalay dugsiga sare (Jaamacad-horaadiyo Afar Sanno Dugsi Sare ah)
  - Codsiga Diiwaangelinta/Wareejinta Ardayga ee DMGE 02 (halkan laga heli karo <http://www.moec.gov.cy/dme/entypa.html>)
  - Shahaadada dhalashada/ Baasaboorka ama Sharciga degganaanshaha / Dokumeentiga safarka ee Baasaboorka Qaxooniga ama Ruqsadda Degganaanshaha Qaxootiga ee La Aqoonsan Yahay
  - Heshiiska kirada.
  - Qaansheeg uu ku qoran yahay magaca degganaha (qaansheegta korontada).

Dokumeentiyada waa in loo gudbiyaa Xafiiska Waxbarashada Degmada ee ku dhex yaala Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education).

Wixii macluumaad dheeraad ah waalidiintu waxay Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education) kala xiriir karaan:

#### **WASAARADDA WAXBARASHADA (Ministry of Education)**

Kimonos and Thoukydidou Corner

Akropoli, 1434 Lefkosia

Telefoonada: 22800600/700

limaylka: [registry@moec.gov.cy](mailto:registry@moec.gov.cy)

[moec@moec.gov.cy](mailto:moec@moec.gov.cy)

#### 9.2 Dadka qaangaarka ah- Helitaanka Waxbarasho Sare

Ka-faa'iideystayaasha llaalinta Caalamiga ah waxay si siman u heli karaan jaamacadaha isla shuruudo iyo shuruudo ay dalbadaan Muwaadiniinta Qubrus.

Fadlan la soco in iska diiwaangelinta jaamacadha dadweynuhu loo maro imtaxaano qoran iyo keenida dhibco buundo oo gaar ah oo u dhiganta kuwa dugsiga la xushay.

Ka-faa'iidaystayaasha sidoo kale waxay heli karaan Jaamacado gaar ah haddii ay buuxin karaan shuruudaha luuqadeed (Af-Ingiriisi ama Af-Giriig) oo ay awoodaan inay bixiyaan kharashka waxbarasho ama helaan deeq waxbarasho.

#### Ururada Caalamiga ah iyo Hay'adaha Aan Dawliga Ahayn (NGOs) ee Adeegyo Siiya Codsadeyaasha

Hay'adaha:	Xiriirada:
UNHCR (United Nations High Commission for Refugees) Taageero sharchiyeed iyo qareemid	2 Demetrakopoulou Str., 3rd Floor, 1090 Nicosia (Antonis Zenios Tower) Telefoonka: (+357) 22359043/57, Fakiska: (+357) 22359037 limaylka: <a href="mailto:cypni@unhcr.ch">cypni@unhcr.ch</a>
IOM(International Organisation for Migration) Dib-u-noqoshada Ikhtiyaarka ah iyo Isdhexgalqa	Nehru Avenue, P.C. 1102 Nicosia Telefoonka: (+357) 22772270, Fakiska: (+357) 22772265 limaylka: <a href="mailto:iomnicosia@iom.int">iomnicosia@iom.int</a>
Cyprus Red Cross Society Agab, Taageero maskaxeed-bulsheed, Dhar	3 Kypriakou Erythrou Stavrou Street 2063 Strovolos, Nicosia, Cyprus Telefoonka: (+357) 22 504400, Fakiska: (+357) 22 666956 limaylka: <a href="mailto:admin@redcross.org.cy">admin@redcross.org.cy</a> - Limassol - Agias Filaxeos 119a, Limassol 3087, Phone: 25

	<p>355104</p> <p>- Clothes - 4 Griva Digeni Street, 6010 Larnaca. Ballan ka qabso marka hore: 24655080</p>
Cyprus Refugee Council Taageero sharchiyeed iyo shucuureed	<p>Stasandrou 9, Flat 401, 1060 Nicosia, Cyprus</p> <p>Telefoonka: (+357) 22205959 Fakiska: (+357) 22205960</p> <p>Mareegta: <a href="http://cyrefugeecouncil.org">http://cyrefugeecouncil.org</a></p>
Cyprus Stop Trafficking	<p>Telefoonka: (+357) 97 853767</p> <p>Khadka Macluumaaadka: (+357) 22 771063 ama (+357) 22 750108</p> <p>Imaylka: <a href="mailto:cypus.stop.trafficking@gmail.com">cypus.stop.trafficking@gmail.com</a> <a href="http://www.cyprusstoptrafficking.webs.com">www.cyprusstoptrafficking.webs.com</a></p>
Dignity Centre Nicosia Hawlah: Koorsootin luuqadeed, cashar kombiyuutareed, qorista sooyaalka aqoonta (CV).	<p>17 Perikleous Street, Nicosia 1010, Cyprus</p> <p>Telefoonka: (+357) 99 173967</p> <p><a href="https://www.facebook.com/DignityCentreNicosia/">https://www.facebook.com/DignityCentreNicosia/</a> <a href="http://www.refugeesupport.eu/projects/cyprus">www.refugeesupport.eu/projects/cyprus</a></p>
KISA Isdhexgalka bulsheed iyadoo loo marayo aqoon-isweydaarsiyo farshaxameed	<p>Arsinois 48, Nicosia</p> <p>Cinwaanka: 48 Arsinoes Street, 1010 Nicosia</p> <p>Telefoonka: 22 878181, Fakiska: 22 773039</p> <p>Imaylka: <a href="mailto:info@kisa.org.cy">info@kisa.org.cy</a> <a href="http://www.kisa.org.cy">www.kisa.org.cy</a></p>
Caritas Cyprus Migrant Center Taageero sharchiyeed, daryeel caafimaad, iyo taageero maskaxeed-bulsheed, si loo barto luuqadaha iyo, haddii loo baahdo, si loo helo cunto, dhar.	<p>8 St. Maron Street, Flat 4, Paphos Gate, Nicosia, 1010 Cyprus</p> <p>Telefoonka: +357 22662606 Fakiska: +357 22662656</p> <p>Imaylka: <a href="mailto:administration@caritascyprus.org">administration@caritascyprus.org</a> <a href="http://www.caritascyprus.org">www.caritascyprus.org</a></p> <p>Clothes - Stylianou Lane 49, Maria Court 1, apartment 10, Larnaca. Ballan ka qabso marka hore: Telefoonka. 24323079</p> <p>Caritas Limassol St. Catherine's Saint Catherine Church, Limassol, 3035, Cyprus</p>
Mi-Hub Isdhexgal iyo bixinta macluumaaad, dhar	<p>Nicosia: 20 Aischylou &amp; Platonos, 1503</p> <p>Limassol: 230 Agiou Andrea and Katsounotou, 3036</p> <p>Larnaca: 8 Apollonos Street, Christodoulides Court, 6016</p> <p>Pafos: 39 Eleftheriou Venizelou Avenue, Cronos Center, Shop 1, 8021</p> <p>Mareegta: <a href="http://www.mihub.eu">www.mihub.eu</a>, Telefoonka: 22 080350</p> <p>Clothes - 1 Archiepiskopou Leontiou I, 6021 Larnaca</p> <p>Ballan ka qabso marka hore: Telefoonka. 24002266, 99797427</p>
Hope For Children (HFC) Xuquuqda carruurta	<p>Cinwaanka: 75 Limassol Avenue, 2nd Floor, Office 201, 2121 Nicosia,</p> <p>Telefoonka: 22 103234</p> <p>Imaylka: <a href="mailto:info@uncrcpc.org">info@uncrcpc.org</a> Mareegta: <a href="http://www.uncrcpc.org">www.uncrcpc.org</a></p>
OASIS Project Casharrada luuqadda Af-Ingiriiska, casharrada akhrinta injiilkha, mashaariicda dhexgalka bulshada-isdhexgalka bulsheed, dharka	<p>1 Archiepiskopou Leontiou I, 6021 Larnaca</p> <p>Ballan ka qabso marka hore: Telefoonka. 24002266, 99797427</p>
Cyprus Theatre Organisation Ciyaaro tiyaatar iyo aqoon-isweydaarsiyo loogu talagalay carruurta iyo dhallinta	<p>9, Grigori Afxentiou, 1096 Nicosia</p> <p>Cyprus</p> <p>Telefoonka: +357 22 864300/1, Fakiska: +357 22 512732</p> <p>Imaylka: <a href="mailto:info@thoc.org.cy">info@thoc.org.cy</a> <a href="http://www.thoc.org.cy">www.thoc.org.cy</a></p>
S.P.A.V.O (ΣΠΑΒΟ) Adeegga kahortagga rabshadaha	<p>Kyrenias 178. 2112 Aglantzia, Nicosia, Cyprus</p> <p>Telefoonka: +357-22-339001</p>

## Xiriirada muhiimka ah

Lambarka La Waco ee Gurmadka ee Gaarka ah ee loogu talagalay xaaladaha degdegga ah meel kasta oo ka mid ah Midowga Yurub	122 (bilaash ah)
Isbitaalada ku yaala Qubrus	<ul style="list-style-type: none"> <li>Nicosia: 22 603 000</li> <li>Limassol: 25 801 100</li> <li>Larnaca: 24 800 500</li> <li>Pafos: 26 803 100</li> <li>Paralimni: 23 200 000</li> </ul>
Farmashiyeyaasha ku yaala Qubrus	<ul style="list-style-type: none"> <li>Nicosia: 90 901 412</li> <li>Limassol: 90 901 415</li> <li>Larnaca: 90 901 414</li> <li>Pafos: 90 901 416</li> <li>Paralimni: 90 901 413</li> </ul>
Booliska Qubrus	<ul style="list-style-type: none"> <li>Nicosia: 22 802 020</li> <li>Limassol: 25 805 050</li> <li>Larnaca: 24 630 200</li> <li>Pafos: 26 806 060</li> <li>Paralimni: 23 803 200</li> </ul>

## Cuntooyinka iyo Deeqaha Lacag La'aanta ah

Hay'adda	Cinwaanka	Macluumaadka
Karvounomageiremata Restaurant	Ledras 154, Nicosia, close to McDonalds	Casho lacag la'aan ah maalin kasta laga bilaabo 22:30 ilaa 23:00.
Caritas Cyprus Holy Cross Church	U dhow hoyga, u dhow Paphos Gate, Nicosia	Qaddo lacag la'aan ah Axad kasta laga bilaabo 12:30 ilaa 14:00 gudaha beerta Kaniisadda.
Nicosia Mercy Centre	Pericleous Street, Old Nicosia	Quraac lacag la'aan ah subax kasta oo jimco ah Casho lacag la'aan ah Arbaco kasta laga bilaabo 18:30 ilaa 20:00.
ST Paul's Cathedral	Byron Street, opposite the Greek Embassy	Casho lacag la'aan ah Isninta ugu horreysa bil kasta laga bilaabo 18:00 ilaa 20:00.
Cyprus Red Cross Society	Kypriakou Erythrou Stavrou, Strovolos, Nicosia	Waxay siyaan hal sanduuq oo raashiin ah qof kasta bishiiba.
Friendship Circle Cyprus	Aristomenous 4a, Larnaca, Cyprus	Bixinta kaalmada iyo taageerada loogu talagalay qoysaska leh carruurta qabta baahiyaha gaarka ah iyo sidoo kale shakhsiyadka iyo qoysaska (Cuntooyin la keeno albaabkaaga)

## Cinwaanada muhiimka ah

<b>Adeegyada Magangelyada (Asylum Service)</b>	70 Arch. Makarios III Ave., Afemia House, 1077, Nicosia Telefoonka.: (+357) 22308502, (+357)22308503, (+357) 22308504 <a href="http://www.moi.gov.cy/asylum">www.moi.gov.cy/asylum</a>
<b>Xafiisyada Socdaalka Gobolka</b>	<p><b>Waaxda Shisheeyaha iyo Socdaalka Nicosia (Nicosia Aliens and Immigration Unit)</b> 6, Agamemnonos Egkomi, 2411 Nicosia Telefoonka.: (+357) 22607000, Fax: Tel.: (+357) 227755551 limaylka: <a href="mailto:aidnicosia@police.gov.cy">aidnicosia@police.gov.cy</a></p> <p><b>Waaxda Shisheeyaha iyo Socdaalka Limassol (Limassol Aliens and Immigration Unit)</b> 223, Fragklionou Rousvelt, D. Nikolaou Building, 2<sup>nd</sup> floor, 3046 Limassol Telefoonka.: (+357) 25805222, Fax: (+357)25805651 limaylka: <a href="mailto:aidlimassol@police.gov.cy">aidlimassol@police.gov.cy</a></p> <p><b>Waaxda Shisheeyaha iyo Socdaalka Larnaca (Larnaca Aliens and Immigration Unit)</b> 34, Tasoy Mitsipoulou, Makenzy, 6027 Telefoonka.: (+357) 24804222 limaylka : <a href="mailto:aidlarnaca@police.gov.cy">aidlarnaca@police.gov.cy</a></p> <p><b>Waaxda Shisheeyaha iyo Socdaalka Paphos (Paphos Aliens and Immigration Unit)</b> 22, Eleftheriou Venizelou Avenue and Kaniggos Street 2<sup>nd</sup> floor, 8021, Paphos Telefoonka.: (+357) 26806201, Fakiska : (+357) 26911219 limaylka: <a href="mailto:aidpaphos@police.gov.cy">aidpaphos@police.gov.cy</a></p> <p><b>Qaypta Shisheeyaha iyo Socdaalka Famagusta (Famagusta Aliens and Immigration Unit)</b> 83, Eleftherias Avenue, Tapolos Building 1st floor, 53800, Famagusta Telefoonka.: (+357) 23803280, Fakiska : (+357) 23811308 limaylka : <a href="mailto:aidfamagusta@police.gov.cy">aidfamagusta@police.gov.cy</a></p>
<b>Xafiisyada Daryeelka Bulshada ee Goboleed</b>	<p><b>Adeegyada Daryeelka Bulshada (Social Welfare Services)</b> 63, Prodromou, 1468 Nicosia Telefoonka.: (+357) 22406709, Fakiska : (+357) 22667907</p> <p><b>Adeegyada Daryeelka Bulshada (Social Welfare Services) - Nicosia District</b> 63, Agiou Ilarionos, 1026 Nicosia Telefoonka.: (+357) 22804605, Fakiska : (+357) 42804666</p> <p><b>Adeegyada Daryeelka Bulshada (Social Welfare Services) - Limassol District</b> 80, Franklin Roosevelt, 3011 Limassol Telefoonka.: (+357) 25804535, Fakiska : (+357) 25306576</p> <p><b>Adeegyada Daryeelka Bulshada (Social Welfare Services) - Larnaca District</b> 23-25, Pelliou, 6301 Larnaca Telefoonka.: (+357) 24800101, Fakiska : (+357) 24304876</p>
<b>Xafiisyada Shaqaalaaysiinta (Labour Offices)</b>	<p><b>Nicosia</b> 3 Mousiou Street Telefoonka.: (+357) 22403000</p> <p><b>Larnaca</b> Philios Tsigarides Street Telefoonka.: (+357) 24805312</p>

	<p><b>Paphos</b>  Ayiou Spyridonos Street  Telefoonka.: (+357) 26821658</p>
	<p><b>Polis Chrysochous</b>  1 Arsinois and Timohari Street  Telefoonka.: (+357) 26322409</p>
	<p><b>Limassol</b>  80 Franklin Roosevelt Street  Telefoonka.: (+357) 25827350</p>
	<p><b>Dherynia</b>  29 Acropoleos Street  Telefoonka.: (+357) 23812052</p>
<b>Labour Offices waxay sidoo kale ku yaalaan xaafadaha iyo tuulooinka soo socda.</b>	<p>Aglantzia, Lakatamia, Latsia, Ypsonas, Eastern Limassol, Agros and Aradippou</p>
<b>Administrative Court of International Protection</b>	<p>5, Costi Palama Street, 1096, Nicosia  Telefoonka.: (+357) 22747500, Fakiska: (+357) 22747537</p>
<b>Isbitaalada</b>	<p><b>Nicosia General Hospital</b>  Nicosia-Limassol Old Road, no. 213, 2029 Strovolos  Telefoonka: (+357) 22603000  Fakiska: (+357) 22603008  limaylka: <a href="mailto:ngh@mphs.moh.gov.cy">ngh@mphs.moh.gov.cy</a></p> <p><b>Larnaca General Hospital</b>  Enomenon Politeion, 6301, Larnaca  Telefoonka: (+357) 24800500  Fakiska: (+357) 2430429</p> <p><b>Larnaca Old Hospital</b>  Grigori Afxentiou, 30/1  Larnaka, 6021  Telefoonka: (+357) 24828768</p> <p><b>Limassol General Hospital</b>  Leoforos Nikaias, 3304, Kato Polemidia  Telefoonka: (+357) 25801100 Fakiska: (+357) 25305783</p> <p><b>Famagusta General Hospital</b>  25 Christou Kkeli, 5310, Paralimni  Telefoonka: (+357) 23200000 Fakiska: (+357) 23200100  limaylka: <a href="mailto:amochostos.hospital@cytanet.com.cy">amochostos.hospital@cytanet.com.cy</a></p> <p><b>Paphos General Hospital</b>  1 Achepans, Anavargos Street, 8026 Paphos  Telefoonka: (+357) 26 803100  Fakiska: (+357) 26306103</p> <p><b>Makario Childrens Hospital</b>  6 Korytsas Street, Acropolis, Strovolos, 2012  Telefoonka: (+357) 22405000</p>
<b>Xafiisyada Maamulka Degmada</b>	<p><b>Nicosia District Administration Office</b>  Ku yaala: 2 Alkaiou Street, Strovolos 1458 Nicosia  Telefoonka: 22 804 222 Fakiska: 22 665 990 / 22 302087</p> <p><b>Larnaca District Administration Office</b>  Ku yaala: 19-21 Constantinos Paleologos Street, PO Box</p>

	40103, 6301 Larnaca Telefoonka: 24 801 818 Fakiska: 24 304 635
	<b>Limassol District Administration Office</b> Ku yaala: Gregoris Afxentiu Square (Anexartisias), 3304 Limassol Telefoonka: 25 806 400 / 25 305 382 Fakiska: 25 305 288 / 25 305 493
	<b>Paphos District Administration Office</b> Ku yaala: 5 Nikodemos Mylonas Street, 8100 Paphos Telefoonka: 26 801 101 Fakiska: 26 306 251

